

Oggolaansho Authorization

Ma codsanayo in diiwaanada la fasaxo waqtigaan. Fadlan geli ansaxintaan feelka macmiilkeyga.

OGGOLAANSHAHA LAGU SIIDEYNAYO DIIWAANADA DSHS EE:			
MAGACA DAMBE	KOOWAAD	MAGACA DHEXE	TAARIIKHDA DHALASHADA
Macluumaadkan soo socda wuxuu caawimo ka geysan kartaa helista diiwaanada:		MAGACYADII HORE	
LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA	LAMBARKA AQOONSIGA KALE	TAARIIKHHAHA ADEEGGA	GOOBTA ADEEGGA
LOO SII DAAYAY:			
MAGACA DAMBE	KOOWAAD	MAGACA DHEXE	JAGGO
MAGACA HAY'ADDA AMA GANACSIGA HADDII AY KU HABBOON TAHAY			
CINWAANKA	MAGAALADA	GOBOLKA	FURAHA DEEGAANKA
LAMBARKA TELEFOONKA (KUDDAR KOODHKA DEGAANKA)	LAMBARKA FAAKISKA (KUDDAR FURAHA XAAFADA)	CINWAAN E-MAIL-KA	
SABABTA SHAACINTA (LOOMA BAAHNA)			

OGGOLAANSHO:

ILAHA AMA XOGTA: Waxaan u oggolaaday barnaamijyadan DSHS ee soo socda in ay siideyaan ama in ay u bixiyaan macluumaadka qarsoodiga ah ee aniga igu saabsan sida hoos lagu qeexay. Macluumaadka waxaa lagu bixin karaa hadal ahaan ama wareejin xog kombiyuutar, boosto, fakis, ama gaarsiin gacanta ah. Calaamadee dhammaan kuwa ku habboon:

- | | |
|---|--|
| <p>Caafimaadka Dabeecada (BHA)</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Machadyada Caafimaadka Damiirka Gobolka (ESH, WSH, CSTC) <input type="checkbox"/> Xarunta Ka go'naanta Gaarka (SCC) <input type="checkbox"/> Adeegyada Caafimaadka Damiirka Baaritaanka dambiga (OFMHS) <input type="checkbox"/> Wax kale (tusaale, Xarunta dhexe, RTFs): <p>Adeegyada Dhaqaalaha (ESA)</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Adeegyada Bulshada (CSD – caawinta dadweynaha) <input type="checkbox"/> Taageerada Carruurta (DCS) <input type="checkbox"/> Adeegyada Go'aaminta Naafnimada (DDDS) <input type="checkbox"/> Wax kale (tusaale ahaan, Xarunta dhexe): <p>Xafiiska Xoghayaha (OOS)</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Maareynta Qatarta Ganacsiga (ERMO) <input type="checkbox"/> Waaxyada Shaqaalaha (Shaqaalaha DSHS) <p><input type="checkbox"/> Dhammaan qaybaha Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS)</p> | <p>Gabowga iyo Taageerada Muddada Dheer (ALTSA)</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Adeegyada Gurigas iyo Bulshada (HCS) <input type="checkbox"/> Adeegyada Daryeelka Dagayaasha (RCS) <input type="checkbox"/> Adeegyada Ilaalada Qofka weyn (APS) <input type="checkbox"/> Wax kale (tusaale ahaan, Xarunta dhexe): <p>Xarumaha, Maaliyada, iyo Falanqeynta (FFA)</p> <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Qeybta Dhexe ee Baaritaanka Asalka (BCCU) <input type="checkbox"/> Qiyaanada iyo La xisaabtanka (OFA) <input type="checkbox"/> Fasaxa / Joornaatiga (DSHS Shaqaalaha) <input type="checkbox"/> Hormarinta Naafnimada (DDA) <input type="checkbox"/> Dhaqan celinta Xirfada (DVR) <input type="checkbox"/> Waxkale: |
|---|--|

DIIWAANO: Waxaan oggolaanayaa diiwaanadan DSHS ee soo socda in la siidaayo:

- Diiwaanada ay qabteen qeybaha DSHS ee kor lagu calaameeyay Diiwaanada liiska ku lifaaqan
- Diiwaanada xiggo kaliya:

FADLAN XUSUUSNOW: Haddii macmiilkaaga iyo diiwaanada kale ee qarsoodiga ah waxaa ka mid ah warbixin walboo xigta, waa inaad sidoo kale dhameystirtaa qeybta hoose si aad ugu ogolaatid siideynta diiwaanadaan.

DIIWAANADA GAARKA AH: Waxaan bixinayaa fasaxeyga ee lagu siideynayo macluumaadka soo socda ee lagu hayo diiwaanada DSHS (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):

- Natijoooyinka baarista HIV/AIDS iyo STD, diiwaanada daaweynta ama oggaanshaha cudurka (RCW 70.02.220)
- Diiwaanada caafimaadka dhimirka (RCW 70.02.230 ama 240)
- Diiwaanada Cudurka Isticmaalka Maandooriyaha (42 CFR Qeybta 2)

- Ogolaanshahaan wuxuu shaqeynayaa 180 maalmood ama ilaa _____ (taariiqda ama dhacdada, haddii aan la hubin, waxay ahaaneysaa 180 maalmood).
- Waxaan ku burin karaa ama kaga noqon karaa fasaxeyga qoraal waqti kasta, balse taa ma saameynayso macluumaadka horey loo soo saaray.
- Waan fahamsannahay in diiwaanadeyda aysan markale ku illaalsaneyn sida waafaqsan sharciyada quseeyo DSHS kadib markii la soo saaro.
- Koobiga foomkaan wuxuu shaqeynayaa inuu bixiyo ogolaanshaheyga lagu fasaxayo diiwaanada. DSHS waxay kugu soo dalaci kartaa lacag si ay u bixiso nuqulada diiwaanadeeda.

WAXAA ANSIXIYEY (SAXIIX)	TAARIIKHDA LA SIXIIXAY	LAMBARKA TELEFOONKA (FURAHA XAAFADA)
QOR MAGACA	MARKHAATI/NOOTAAYE (SAXIIX OO KU QOR MAGAC, HADDII LA ADEEGSAN KARO)	

Haddii aanan ahayn qofka ay khuseeyaan diiwaanadu, waxaan la ii oggolaaday in aan saxiixo sababtoo ah waxaan ahay: (soo lifaaq caddayn midaasi awood kuu siinaysa)

- Waalidka canuga Masuulka Sharciga Wakiilka Shaqsiga Wax kale:

Oggaysiis ku socda kuwa helaya macluumaadka: Haddii diiwaanadan ay ku jiraan macluumaad ku saabsan HIV(aydhis), Cudurada Galmada La isku qaadsiiyo, ama khamriga ama adeegsiga maandooriyaha, ma siidayn kartid macluumaadkaas iyada oo la hoostagayo sharciga gobolka iyo midka dowladda dhexe la'aanta fasaxa gaarka ah ee qofka ay khuseeyso iyo ka soo bixidda shuruudaha sharciga gaarka ah.

TILMAAMO LOOGU TALOGALAY DHAMMEYSTIRIDDA FOOMKA OGGOLAANSHAHA

Ujeedo: Waa in aad adeegsato foomkan marka aad doonaysid DSHS in ay siideyso macluumaadka qarsoodiga ah ee adiga kugu saabsan qof kale (oo ay ka mid yihiin qareen, sharci-dejiye, ama qaraabo). Waxaad bixin kartaa fasax loogu siideynayo dhammaan diiwaanada qarsoodiga ah ee ay DSHS ay adiga kaa hayso ama waxaad ku xadidi kartaa fasaxaaga diiwaano gaar ah ama qaybo ka mid ah hay'adda. Foomkan wuxuu sidoo kale u oggolaanayaa DSHS in ay hadal ahaan ugala hadasho xaaladaada qofka aad u oggolaatay.

Ogeysiis ku socda Macaamiisha: Macluumaadka macmiilka badankii ee ay DSHS hayso waa qarsoodi loomana siideynayo dadka kale haddii aad oggolaato fasax mooyaane ama haddii siideynta uu sharciya oggol yahay. Kadib marka DSHS ay siideyso macluumaadkaaga qarsoodiga ah, fadlan ogsoonow in helaha laga yaabo in uusan ilaalin diiwaanadaada iyada oo la hoostagayo isla sharciyada loo adeegsan karo DSHS. DSHS kuuma diidi karto faa'iidooyinkaaga haddii aadan saxiixin foomkan si aad ugu oggolaato siideynta DSHS haddii oggolaanshahaaga loo baahan yahay si loo go'aamiyo u-qalmitaanka. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida qaybaha daryeelka caafimaadka DSHS ee uu caymiyo HIPAA ay u wadaagaan macluumaadka caafimaadka dhawrsan iyo xuquuqahaaga asturnaanta, fadlan la tasho Ogeysiiska DSHS ee Habdhaqanada Asturnaanta www.dshs.wa.gov ama wayddii qofka ku siiyey foomkan. Waxaad heli kartaa nuqulka foomkan.

Isticmaal: Waxaad foomkan u buuxin kartaa elektaroonig ahaan ama gacan ahaan. Isticmaalka furaha tabka ee kumbuyuutarka si aad ugu kala socoto godadka (field-yada). **Foom gaar ah waa in loo buuxiyo qof kasta ee diiwaanadiisa la codsaday, oo ay ka mid yihiin carruurta.** "Adiga" waxaa loola jeedaa qofka ay khuseeyaan diiwaanada.

Qaybaha Foomka:

AQOONSASHADA QOFKA AY KHUSEEYAAN DIIWAANADA:

- **Magaca:** Bixi magacaaga oo dhammeysiran ama magaca qofka diiwaanadiisa la codsadey haddii aad metalayso qof kale.
- **Taariikhda dhallashada:** Fadlan ku soo dar macluumaadkan ee loo baahan yahay si lagaaga aqoonsado shaqsiyaadka leh magacyada la midka ah.

MACLUUMAAD IKHTIYAARI AH oo caawimo ka geysanayo helidda diiwaanada:

- **Magacyadii hore:** Kusoo dar magacyo kasta oo kale ee la adeegsaday marka la qaadanayey dheefo ama adeeygo.
- **Lambarka aqoonsiga macmiilka:** Bixi lambar kasta ee laga yaabo in DSHS ay u qoondeysay.
- **Lambarka kale ee aqoonsiga:** Ku dar aqoonsi kasta oo kale ee caawimo ka geysan kara helidda diiwaanada DSHS. Kaliya bixi lambarka damaanada bulshada haddii loo baahdo.
- **Taariikhda iyo goobta adeegyada:** Bixi macluumaadkan si aad ugu caawiso DSHS in ay aqoonsato oo ay hesho diiwaanada aad doonaysid in la siidaayo.

SHAQSIGA HELAYA DIIWAANADA:

- **Aqoonsiga:** Fadlan u buuxi qaybtan si buuxda oo suuragal ah si aan ula xiriirno qofka ama hay'adda helaya macluumaadkaaga qarsoodiga ah.
- **Sababta Siideynta:** Macluumaadkan waxaa loo baahan yahay ka hor inta DSHS aysan wadaagin diiwaanada caafimaadka dhimirka ama khamriga ama daroogada. Haddii aadan buuxin godkan(fieldgan), DSHS waxay sheegaysaa sababta siideynta in ay tahay codsigaaga.

OGGOLAANSHO:

- **Qaybaha DSHS:** Fadlan calaamadee midkood qaybaha DSHS ee aad doonaysid in ay siideyso diiwaanada ama calaamadee sanduuqa hoose ee qaybtan haddii aad doonaysid in ay helaan diiwaano kasta DSHS ay kaa hayso. Ku qor magaca barnaamijka " Kale" haddii uusan ku jirin liiska.
- **Macluumaadka la sii daayey/shaaciye:** Tilmaan diiwaanada aad doonaysid in la siidaayo. Waxaad oggolaan kartaa siideynta ee dhammaan ama qayb ka mid ah macmiilkaaga DSHS ama diiwaanada kale ee qarsoodiga ah. Waxaad sidoo kale xaddidi kartaa siideynta diiwaanada macmiilka kalita qaybaha hay'adda ku calaamadeysan qaybta kor, ama diiwaanada gaarka ah ee lagu qoray foomkan ama lifaaq aad saxiixdo. Haddii ay jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan diiwaanada aad doonaysid in la siidaayo, qor midkood diiwaanada gaarka ah ama sharax xaddidaadyada, sida taariikhda adeegyada ama nooca diiwaanka.
- **Diiwaanada xaddidan:** Haddii kuwa ka mid ah diiwaanada ay ka mid yihiin warbixinta ku saabsan HIV/AIDS ama baaritaanka iyo daaweynta STD, bayaanka caafimaadka damiirka, ama adeegyada cudurka isticmaalka maandooriyaha, waa inaad hubisaa shey walba si aad ugu oggolaatid DSHS inay fasaxdo diiwaanada. Isticmaal Ansixinta Daaweynta cilmi nafsiga, foomak DSHS 17-270, si aad ugu ansixisid siideynta qoraalada daaweynta cilmi nafsiga (45 CFR 164.508(b) (3) (ii)).
- **Ansaxnimada:** Foomkan wuxuu ansax u yahay in uu bixiyo macluumaadka ay hadda hayso DSHS. Fasaxaaga wuxuu dhacayaa 180 maalmood kadib saxiixa ama taariikh kale ama dhacdada aad bixiso. Haddii aadan bixin taariikh, oggolaanshaha wuxuu ansax ahaanayaa muddo 180 maalmood ah. Waxaad ka laaban kartaa awoodda lagu sii daynayo diiwaanada qoraal ahaan waqti kasta balse waxay noqonaysaa waqti dambe in dib loo soo ceshto macluumaadka hore loo soo saarey.
- **Qiiamaha:** Xeerka diiwaanada guud ee RCW 42.56.120 iyo WAC 388-01-080 waxay u oggolaanayaan DSHS in ay lacag ku soo dalacdo nuqullada diiwaanada oo lagu daray kharashaadka boostada. Isbitaalada gobolka iyo xaramaha daryeelka caafimaadka waxay ku dalaci karaan lacag diiwaanada bukaanka iyada oo la eegayo Cutubka 70.02 RCW.

SIXIIXDA

- **Haddii aad tahay qofka ay khuseeyaan diiwaanada,** saxiix oo sidoo kale daabac ama ku qor magacaaga hoos. Geli taariikhda aad saxiixday oo la socda telefoonkaaga ama lambarka xiriirka.
- **Haddii aad u saxiixayso qof kale,** tilmaan sababta aad sidaa u sameyn karto xariiqa ugu dambeeya waxaadna ku soo lifaaqdaa nuqulka amarka maxkamadda ama dokumeenti kale oo ku siinaya awood sharci. Carruurta waa in ay sidoo kale saxiixaan si ay fasax u bixiyaan si ay u sii daayaan diiwaanadooda qarsoodiga ah haddii ay ka weyn yihiin da'da oggolaanshaha (13 caafimaadka dhimirka iyo adeegyada daroogada iyo khamriga; 14 macluumaadka ku saabsan HIV/AIDS(aydhiska) ama Cudurada Galmada La isku qaadsiiyo (STD-yada kale); da' kasta ee xakameynta dhalnada iyo ilmo soo rididda; 18 diiwaanada caafimaadka iyo kuwa kale).
- **Markhaati ama nootaaye:** Markhaati ama nootaaye ayaa loo baahan karaa si uu u xaqiijiyo aqoonsigaaga haddii aadan adiga shakhsi ahaan soo gudbin foomkan ama haddii barnaamij uu codsado xaqiijin. Qofkan waa in uu saxiixoo oo uu qoro magaciisa ama magaceeda.

OGEYSIIS KU SOCDA DSHS: Haddii diiwaanadan ay ku jiraan macluumaadka HIV ama STD, DSHS waa in ay ku wargeliso qaatayaasha in macluumaadka uu yahay mid qarsoodi ah iyo in aysan siideyn karin diiwaanada oggolaansho gaar ah la'aan sida uu u baahan yahay RCW 70.02.300. Haddii DSHS soo diraan koobiyada diiwaanada la xiriirto adeegyada cudurka isticmaalka maandooriyaha sida waafaqsan ansixinta, DSHS waa inay ku dartaa bayaanka xiggo markii aad u fasaxaysid warbixin sida looga baahanyahay 42 CFR 2.32:

Macluumaadkan waxaa lagaaga soo siidaayey diiwaano ay ilaalinayaan Sharciyada qarsoodi ahaanta dowladda dhexe (42 CFR part 2). Sharciyada Federaalka waxay kaa mamnuucayaan in aad ku sameysid sii dayn kale oo dheeri ah macluumaadkan haddii sii dayn dheeri ah si cad loogu oggolaaday oggolaanshaha qoraalka ah ee qofka arrinta ay khuseysa ama haddii kale lagu oggolaaday sharciya 42 CFR qaybta 2. Oggolaansho guud oo loogu talagalay sii daynta macluumaadka caafimaadka ama macluumaad kale ma AHAN mid ku filan ujeeddadan. Sharciyada Federaalka waxay xaddidayaan isticmaal kasta ee ah macluumaadka si dambi ahaan loo baaro ama dambi loogu soo oogo bukaan ku xadgudbey daroogo ama khamriga.